# XAASHIDA XAQIIQDA # 1
# KU SAABSAN COLOUR OF POVERTY – COLOUR OF CHANGE

waxaa jira sare u kicid ka timid sinnaan la'aanta iyo midab kala soocida Ontario. Taas oo dhalisay sinnaan la'aan dhinaca waxbarashada, xaalada caafimaad, fursadaha shaqo iyo rajada dhaqaalaha, iyo ugu danbeyntii natiijada nolosha, ayaa ka soo baxday. Hadaan nahay Colour of Poverty Colour of Change waxaan aaminsanahay in aan ku gaari karno wadashaqeyn isbadalka loo baahan yahay si faaiido wadaag loo wada noqdo

Colour of Poverty Colour of Poverty Colour of Change ayaa ah olole ka kooban shakhsiyaad iyo hay'ado ka shaqeeya sidii loo dhisi lahaa awood ku saleysan wax ka qabashada faquuqa saboolnimada iyo natiijooyinka sii kordhaya ee caburinta iyo takoorista bulshooyinka kala midabka ah (dadka asalka ah iyo dadka midabka leh labadaba) guud ahaan Ontario. COP-COC wuxuu ku shaqeeyaa sidii loo dhisi lahaa istiraatijiyado lagu qanci karo oo horumar leh iyo in la dhiso awood ku saleysan bulshada iyadoo loo marayo shaqsiyaad kooxo iyo ururaba sidii wax looga qaban lahaa sinaan la aanta sii kordheysa ee k u dhisan isir naceybka ka jira guud ahaan Ontario iyo Canad

COP-COC waxay si rasmi ah isugu yimaadeen 2007 si kor loogu qaado wacyigalinta dadweynaha ee ku saabsan arimaha saamaynaya bulshooyinka midabka leh- fahamka. Sida ugu wanaagsan ee loo soo bandhigi karo arinkana in ay tahay sinnaanta jinsiga bulshada dhexdeeda iyo in xiriir buuxa iyo wada shaqeyn lala yeesho dadka asaliga ah. Bishii September 2007 shabakadu waxay bilawday ololihii midabka saboolka si loo muujiyo kor u qaadista ku timid cunsuriyadda ee ku saleysan saboolnimada gobolka Ontario. Hawlgalka socda ee ku saabsan xaqiiqda saboolnimada midab- kala-sooca si ay u helaan shaqsiyaadka iyo ururaduba waxaan soo saarnay taxanahan dhameystran waraaqaha xaqiiqda ah kuwoodii ugu danbeyay

## COP-COC GUULAHOODA

**COP-COC** waxay hada ku hawlan tahay sidii ay si wanaagsan ugu dhisi lahayd dhamaan guulaha la gaadhay tobankii sano ee lasoo dhaafay qaab si buuxa ula jaan qaadaya runta iyo gudiga dib u heshiisiinta (TRC) 94 wicitaano ficil. guryaha ee qaran.

**COP-COC** waxay la tashatay guddi qaramada midoobay, sidii loo ciribtiri lahaa midabtakoorka taas oo dhalisay talooyin ku saabsan qorshaha waxqabadka Kanada ee ka dhanka ah cunsuriyadda (CAPAR) taas oo dowladda Canada ay hadda ogolaatay

**COP-COC COP-COC** waxay riixday agaasim ka hortaga midabtakoorka waxayna dejisay sharciga ka hortagga midabtakoorka ee Ontario.
**COP-COC** waxay riixday saameynta xoogan ee midab takoorka, habka yareynta saboolnimada iyo habka guryaha ee qaran.

**COP-COC** Waxay gacan ka geysatay sidii loo heli lahaa shaqooyin wanaagsan ee deegaanka Toronto oo dhan iyo isbahaysi shabakad faa iido uleh bulshadaToronto, joogteynta diirad saarista sharciga sinnaanta shaqada ee gobolka iyo mudnaanta dood wadaagista.

COP.COC Waxay aqoonsan tahay inay ka shaqeyno dhaqan ahaan dhulalkii ummaddii asalka ahayd ee Mississagua of the new credit anishnawbe Haudenosaunee, Wendat. The Metis, Cree and Huon dadka asaliga ah oo leh dhamaan keydka dadka asaliga ah waxay dalbanayaan cadaalad madaxbanaani si loo helo xiriir qaranimo oo buuxa

## Dulmarka Xaashida Xaqiiqda

**Xaashida Xaqiiqda #1:** Kusaabsan Midabka Saboolnimada Midabka Isbeddelka

**Xaashida Xaqiiqda #2:** Hordhac saboolnimada midabkala sooc

**Xaashida Xaqiiqda #3:** Saboolnimada la xaddiday ee waxbarashada iyo aqoonta

Ardayda midabka leh iyo kuwa asaliga ah waxay la kulmaan takoor xagga iskuulka ah. Waxaa had iyo jeer lagu dhex daadiyaa ama dhex qulqula Barnaamijyo aan tacliin ahayn oo heer hoose ah, oo si caddaalad darro ah loogu bartil-maameedsadado cayrinta.

**Xaashida Xaqiiqda #4:** Saboolnimada ku salaysan caafimaadka iyo daryeelka caruurta

Saboolnimada waxay dadka gelisaa halis aad u weyn oo caafimaad xumo ah, sababto ah dad badan oo midab leh iyo kuwa asaliga ahba waa faqiiriin, waxay la kulmaan dhibaatooyin caafimaad oo ka yimaada walaaca, xaaladaha shaqo ee aan badbaadada lahayn, xaafadaha wasakhaysan, cunno aan ku filnayn. Kuwa badan ayaa dhibaato ku qabo helitaanka dhaqan ahaan ku habboon daryeelka caafimaadka, adeega bulsha iyo taakuleyn kale oo loo baahan yahay, waxayna si aad u matalaan daryeelka ilmaha.

**Xaashida Xaqiiqda #5:** Saboolnimada gaarka oh ee shaqada

Bulshooyinka midabka leh iyo kooxaha asaliga ah ayaa aad ugu badan in ay shaqo la’yihiin ka badan kuwa kale. Waxay si aad ah ugu metalayaan mushaarka hoose, oo aan deganayn, iyo shaqooyin heer hoose ah, oo xuquuqdooda shaqaaluhu aan si buuxda loo ilaalin kuma matali karaan jagooyinka mihnadeed iyo xirfadaha soogalootiga iyo aqoonsiyadooda badanaa laguma aqoonsada Kanada..

**Xaashida Xaqiiqda #6:** Saboolnimada ku salaysan dakhliga iyo kaalmada bulshada.

Saboolnimada ka dhex jirta Bulshooyinka midabka iyo kuwa asaliga ah ayaa si dhakhso leh ugu koraya kuwa aan ku salaysnayn midab kala sooca. Gargaarka bulshada ee Ontaariyo ayaa si xoogan loo jaray 1990-Meeyadii mushaharka ugu yarina wuxu dadka ka dhigaa in ay ka hooseeyaan Khadka faqriga bulshada, iyo la’aanta adeegyada guryaha. Dadka isir raaca ah waxay sidoo kale la kulmaan takoorid iyo dalabyo mamnuuc ah dhinaca milkiilayaasha guryaha. Inta badan soogalootiga dhawaan yimid Toronto waxay ku nool yihiin guryo aan aamin ahayn, guri hoosaadyo.

**Xaashida Xaqiiqda #7:** Midabeynta saboolnimada ee caddaladda iyo booliska.

Bulshooyinka liito, Midabkala sooca – labadaba kuwa asaliga ah iyo Bulshooyinka midabka leh inta badan waa la ilaaliyaa oo ragga iyo dumarka asaliga ah iyo ragga iyo dumarka midabka leh waa kuwo aad ugu matalen jeelasha iyo xabsiyada dhexdooda. Ragga la takooro ayaa si gaar ah loo bartilmaameedsadaa rabshadaha ayadoo la fulinayo sharciga, oo ay ku jirto faaqidaad isirka ee xadka Kanada.

**Xaashida Xaqiiqda #8:** Saboolnimada la xiriira socdaalka iyo dejenta qaxootiga cusub

maadama wajigii socdaalka kanada ay si weyn isu beddeshay dhowrkii sano ee la soo dhaafay heerarka saboolnimada ee soogalootiga ayaa si aad ah sare ugu kacay isla markaana adeegyada taageero ee dejitaanka muhiimka ah ayaa wali si aad ah u hooseeyo maalgelinta. Dadka aan lahayn xaalad si fudud uma heli karaan daryeel caafimaad, waxbarasho, shaqo caddaalad ah ama Ilaalin booliis.

**Xaasiha Xaqiiqda #9:** Saboolnimada la xiriirta guryaha iyo hoy la'aanta.

Bulshooyinka midabka iyo kooxaha asaliga ah leeyihiin heerar sare oo guryo hoose ah iyo hoy la'aan oo ay sababtay saboolnimada iyo shaqa la'aan, goynta barnaamijyada bulshada, iyo la'aanta adeegyada guryaha. Dadka isir raaca ah waxay sidoo kale la kulmaan takoorid iyo dalabyo mamnuuc ah dhinaca milkiilayaasha guryaha. Inta badan soogalootiga dhawaan yimid Toronto waxay ku nool yihiin guryo aan aamin ahayn, guri hooseeyo.

.

**Xaashida Xaqiiqda #10:** Saboolnimada la xiriirta cuntada iyo biyo la'aanta.

Sababta oo ah Bulshooyinka midabka iyo kooxaha asaliga ah si aan kala sooc lahayn waa faqiir waa ay yar tahay in ay awood u helaan cunto ku filan oo caafimaad leh qays kooda, ayaga iyo carruurtooda oo galaya khatar sare oo ah cuduro badan iyo xaalado daba-dheer. Heerarka kaalmada bulshada, mushaharka yar ee dakhliga u ah kuma awoodi karaan in ay helaan cunto caafimaad leh.